


FAAFINTA

RASMIGA

الرسمية



الجريدة

DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA
لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 14-aad. Garowe November 13, 2012

Lam.11

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudhiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Laçagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

TUSMADA

Qaybta Koowaad

Sharciga Tariifada Laysamada Wadayaasha Gaadiidka Puntland

Qaybta labaad

Xeer

Waxba ma leh

Qeybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

Waxba ma leh

Sharci Lr 16. ee 13/11/2012, kuna saabsan Tariifada Laysamada Wadayaasha Gaadiidka DPL.



PUNTLAND STATE OF SOMALIA

**Sharci Lr.16, ee November,13, 2012, kuna saabsan Xeerka
Tariifada Leysimadda Wadayaasha Gaadiidka DPL.**

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad
XGGW/DPL/109/2012 ee 13/11/2012;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen xeerka Tariifada Laysimada
Wadayaasha Gaadiidka DPL.


Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa
Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee
Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

Qodobka 3-aad

Dhaqangalka xeerkani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga
bilaabo maalintuu faafinta rasmiga ah ee Dawladda ku soo baxay,
ka dib ayaa xeerkani sharci noqonayaa, cid kastana ay waajib ku
tahay inuu dhawro kuna dhaqmo xeerkan.

Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud
Madaxweynaha Dawladda Puntland





PUNTLAND STATE OF SOMALIA
THE ACTING PRESIDENT

REF: MWK/DPS/647/2012

GAROOWE

Date:- September 3, 2012

Ku: Guddoomiyaha Golaha Wakiilada Puntland

Ujeedo: Soo gudbin Tacriifada leysimada wadayaasha Puntland.

Mudane Guddoomiye.


Tixraac Go'aankii shirkii Golaha Xukuumada ee Isniin 03/09/2012.

Waxaa halkan kuugu soo gudbinaynaa tacriifada leysimada wadayaasha Puntland oo kala ah sidan hoos ku qoran:


1. Leysinka Derejada Koowaad waa \$ 30 (Sodan doolar)
2. Leysinka Derejada Labaad waa \$ 40 (Afartan doolar)
3. Leysinka Derejada Sedexaad waa \$ 50 (Kontan doolar)
4. Diiwaangelinta qaadista Imtixaanka waa 200,000/Sh.so (Laba boqol oo kun)

Sidaas darteed, waxaan rajeynayaa in Guddiga Joogtada ee Wakiilada Puntland ogolaadaan in lagu sii shaqeeyo.

Wada shaqayn wacan.


Cabdisamed Cali Shire
K/s Madaxweynaha Dawladda Puntland

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOMALIYA



PUNTLAND STATE OF
SOMALIA

GOLAHA WAKIILADA

HOUSE OF REPRESENTATIVES

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

Ref:- XGGW/DPL/ 109 /2012

Garowe, Isniin

Date:- 12/11/2012

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garowe

Ujeedo:- Ansixinta Tariifada Leysamada Wadayaasha Gaadiidka PL

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladdu:-

MARKUU ARKAY:-

Dastuurka DPL qodobkiisa 64-aad

MARKUU ARKAY:-

Soo gudbinta Madaxweynaha ee Ref
MWK/DPS/ 647/2012 ee September 3, 2012
kuna saabsan Tariifada Leysamada
Wadayaasha Gaadiidka Puntland.

MARKUU TIXGELIYEEY:-

Baahida loo qabo Xeerkan

MARKUU DHEGAYSTAY:-

Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada ee
12/11/2012

WUXUU GUDDOOMIYEEY:-

Ansixinta Tariifada Leysamada Wadayaasha Gaadiidka Puntland

Allaa Mahad Leh

Cabdirashiid Maxamed Xirsi
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL

